

Aragtida guud ee aqoonta Iskuulada xaafadaha Vivalla iyo Lundby

Aqoonta waa waxa keliya ee lagu fahmo aduunka..Ilmaha/ardayga aqoonta waxa uu ka helaa bii'ada uu ku noolyahay. Isbedelada soconaa oo ku yimaada, goobta, dhaqanka, luqada iyonadaamyada jira ayaa abuura aqoonta guud, waxbarashada joogtada ah.. Taas waxay ku qorantahay manhajka dugsiyada Lpo 94 iyo manhajka xannaanooyinka Lpfö 98, waxaana soo go'aamiyay baarlamaanka Iswidhan.

Iskuulada iyo xannaanooyinka waxay ardayda/ilmaha siinaayaan shruudo ay ka helaayaan

- **xaqiiqda**, micnaha waxay yaqaaniin erayo, faham, tirooyinkaku hareereysan.
- **fahamka**, micnaha waxay kala saari karaan weedhaha iyo jumlooyinka .
- **awooda wax qabadka**, taasoo ah inay isticmaalaan waxyaabihii ay barteen.
- **aqoonbadni**, aas-aaska garashada, taasoo keenaysa inay aqoonta u isticmaalaan habab kala duwan, eeg kala duwanaashaha iyo isuekaanshaha maadooyinka kala duwan.

Ilmaha/ardayda waxay leeyihiin awood waxbarasho ay ku horumaraan, sidaa daraadeed waa inaya la kulmaan macalimiin aqoon sare leh oo horumarkooda rajo wanaagsan gelinaaya.

Ilmaha/ardayda waxay leeyihiin rabitaan ay ku raadsadaan aqoonta, sidaa daraadeed waxaan rabnaa inaan udeyno ilmo walba qibradiisa iyo waxbarashadiisa hore.

Ilmaha/ardayda habab kala duwan ayay wax ku bartaan, sidaa daraadeed waxbaridu waxay noqoneysaa mid la waafajinaayo arday walba fahamkiisa, iyo halabuurkiisa taasoo saldhig u noqoneysa inuu ardayga sii wato waxbarashadiisa.

Ilmaha/ardayda waxay wax ku bartaan waxbaaritaanka, maqalka, sheekada, su'aalo weydiinta iyo inay fikirhooda dhiibtaan, sidaa daraadeed waxaan sameynay hab luqada lagu horumarinyo in ilmaha/ardayga uu wada hadal la geli karo bii'ada ku hareereysan .

Hawsha xannaanada/Iskoolka waxay xiiso gelin u tahay waxbarashada oo la siiwato iyadoo la adkeynaayo awooda garaadka. Shaqada macalinku waa inuu qaabeeyaa hawsha waxbarashada taasoo u keenaysa ardayga in garaadkiisa aqooneed kor u kaco.

Macalinka hawshiisa waa inuu soo bandhigo aqoonta ardayga/ilmaha intay gaarsiisantahay iyo waxa ardayga/ilmaha ka maqan si uu u gaaro himilada uu tiigsanaayo .

Iskoolkeena/xannaanadeena waxay ku shaqeysaa mowqif dimuqraadiyad ku dhisan, sidaa daraadeed ilmaha/ardayga waa inuu qeyb ka ahaadaa waxbarashadiisa iyo shaqadiisa.

Ilmaha/ardayga waxa uu ku bislaadaa marka loo dhiibo mas'uuliyada shaqadiisa si uu horumar ugu sameeyo waxbarashadiisa. Iyadoo laga baaraan degaayo, la qiimeynaayo, laga hadlaayo habab kale oo waxbarasho talosiin waxay adkeyneysaa fahamka ilmaha/ardayga waxayna cadeyneysaa aqoonta ilmaha intay gaarsiisantahay iyo waxyaabaha ka maqan oo loo baahanyahay in la baro.